

# You can't ~~X~~ shape London's future.

**Wax yar ~~X~~ waxay sameyn  
karaan farqi weyn.**

Ku muuji summaddaada  
doorashooyinka

**Duqa Magaalada ee London iyo  
Golaha London**

**2 Maajo 2024**

Keen sawirka aqoonsiga  
si aad u codeyso.

Ka hel wax badan barta  
**[londonelects.org.uk](http://londonelects.org.uk)**



2-da Maajo 2024, dadka ku nool London waxay u codayn karaan Duqa Magaalada ee London iyo 25 xubnood oo Golaha London ah.

Shaqada Duqa Magaalada waa inuu London ka dhigo meel u sii wanaagsan qof kasta oo soo booqda, ku nool ama ka shaqeeya magaalada.

Tani waxaa ka mid ah horumarinta xeerarka, dejinta miisaaniyadaha, kormeerida barnaamijyada waaweyn iyo u ololaynta London ee adduunka oo dhan – dhammaan si waafaqsan aragtida Duqa Magaalada iyo danaha London iyo reer London.

Golaha London waxa uu ka kooban yahay 25 xubnood – 11 ka mid ahi waxa ay matalaan caasimadda oo dhan 14 ka mid ahna waxaa soo doorta deegaan doorashooyinka London.

Goluhu wuxuu u taaganyahay sida indhaha iyo dhegaha reer London ee Hoolka Dawladda Hoose. Xubnuhu waxay la xisaabtamaan Duqa Magaalada iyagoo eegaya xeeladaha, go'aamada iyo tallaabooyinka Duqa Magaalada si ay u hubiyaan inay ku jiraan danta guud.

## MARKA LA CODEYNAYO

2-da Maajo 2024, goobaha codbixintu waxay furmi doonaan laga billaabo 7 subaxnimo - 10 galabnimo. Waa inaad hiigsataa inaad waqti badan ku timaado si aad codkaaga u dhiibato.

**Waa inaad keentaa aqoonsiga sawirka si aad u codayso. Wax badan uga ogow bogga xiga.** Haddii aad ku codaynayso boostada, waxaad heli doontaa waraaqahaaga codeynta doorashada ka hor. Waa inaad hubisaa inaad soo celiso ugu dambeyn 10pm 2-da Maajo 2024.

## YAA CODAYN KARA

Waad codeyn kartaa haddii aad:

- jirto 18 ama ka weyn taha 2-da Maajo 2024
- tahay muwaadin Ingiriis, EU ama Commonwealth u qalma oo ku nool London oo isu diiwaangeliyay inuu codeeyo ugu dambeyn 16-ka Abriil 2024

Waxaad iska diiwaangelin kartaa si aad u codeyso barta [gov.uk/register-to-vote](https://www.gov.uk/register-to-vote) ama la xiriir xafiiska diiwaangelinta doorashada ee degmadaada.

## HALKA LAGA CODEEYO

Waxaa jira 3 hab oo aad ku codayn karto.



### 1 Goobtaada codeeynta:

- Ka hor 2-da Maajo waxaa lagu soo diri doona kaadhka codeeynta oo leh faahfaahinada goobtaada codeynta.
- Waxaad ka codayn kartaa keliya goobta codeeynta ee ku qoran kaadhkan.
- Shaqaalaha goobta codeeynta ayaa ku weydiin doona inaad tusto sawirka aqoonsiga. Waxay hubin doonaan inaad u egtahay sawirka aqoonsigaaga, iyo in magacaagu ku jiro diiwaanka doorashada.
- Shaqaalaha goobta codeeynta ayaa kaa caawin kara inaad fahamto waraaqahaaga codeeynta haddii aad u baahan tahay.
- Qasab kuguma aha in aad kaadhkaaga codbixinta u qaadato goobta codeynta balse waxa ay caawin doontaa shaqaalaha.

### Foomamka aqoonsiga sawirka ee la aqbalayo

Waxaad isticmaali kartaa mid ka mid ah noocyada soo socda ee aqoonsiga sawirka ah marka aad ka codaynayso goobta cod bixinta.

### Safarka caalamiga ah

Baasaboora ay bixiso Boqortooyada Ingiriiska, mid kasta oo ka mid ah Jasiiradaha Channel-ka, Isle of Man, Dhulka Dibadda ee Ingiriiska, Aagga Dhaqaalaha Yurub (EEA) ama waddan Commonwealth ah (oo uu ku jiro Kaadhka Baasaboorka Irishka).

### Baabuur wadista iyo baarkinka

Shatiga darawalnimada ee ay bixiso Boqortooyada Ingiriiska, mid ka mid ah Jasiiradaha Channel-ka, Isle of Man, ama gobolka EEA (tani waxaa ku jira shatiga darawalnimada ku meel-gaadhka ah) Calaamad Buluug ah.

## Socdaalka deegaanka

- Kaadhka Baska Qofka Waayeelka ah ee ay maalgelisay Dawladda Ingiriiska
- Kaadhka Baska Qofka Naafada ah ee ay maalgelisay Dawladda Ingiriiska
- Oyster 60+ Card ee ay maalgelisay Dawladda Ingiriiska
- Freedom Pass
- Kaadhka Xaq-u-lahaanshaha Qaranka ee Scottish-ka ee loo bixiyay ujeeddada safarka shatiyeysan (oo ay ku jiraan 60+, naafada ah ama kaadhka baska ee dadka ka yar 22 sano)
- Kaadhka Safarka ee Welsh ee Shatiyeysan ee 60-ka iyo Wixii Ka Weyn
- Kaadhka Safarka Qofka Naafada ah ee Welsh ee Shatiyeysan
- SmartPass-ka Waayeelka ee laga bixiyo Northern Ireland
- SmartPass-ka Indhoolaha Diiwaangashan ama SmartPass-ka Qofka Indhoolaha ee laga bixiyo Northern Ireland
- SmartPass-ka Naafada Dagaalka ee laga bixiyo Northern Ireland
- SmartPass-ka 60+ ee laga bixiyo Northern Ireland
- SmartPass-ka Badhka Nooliga ee laga bixiyo Northern Ireland

## Caddaynta da'da

kaadhka aqoonsiga oo leh caddaynta Nidaamka Heerarka Da'da hologram-ka (kaadhka GUDUBKA).

## Dukumintiyada kale ee dawladdu bixiso

- Dukumeentiga socdaalka biometric-ga
- Kaadhka aqoonsiga qaranka ee uu bixiyo gobolka EEA
- Kaadhka aqoonsiga ee doorashada oo laga bixiyo Northern Ireland

Shahaadada Oggolaanshaha Codbixiyaha: <https://www.electoralcommission.org.uk/i-am-a/voter/voter-id/applying-a-voter-authority-certificate>

Dukumintiga Codbixiyaha Qarsoon: <https://www.electoralcommission.org.uk/i-am-a/voter/register-vote/register-vote-anonymously#>

## Dukumintiga Codbixiyaha Qarsoon:

Haddii aadan haysan foomka aqoonsiga sawirka ee la oggolyahay waxaad codsan kartaa dukuminti aqoonsi cod-bixiye oo bilaash ah, oo loo yaqaan Shahaadada Oggolaanshaha Cod-bixinta, haddii:

- aadan haysan aqoonsi sawir oo la oggolyahay
- aadan hubin in aqoonsiga sawirku uu wali kuu egyahay
- aad ka welwelsantahay isticmaalka nooc ka mid ah aqoonsiga sii jiray sabab kasta oo kale awgeed, sida isticmaalka calaamadaynta jinsiga


Xilliga kama dambaysta ah ee codsigu waa 5-ta galabnimo 24-ta Abriil. Wax badan ka ogow barta: [electoralcommission.org.uk](http://electoralcommission.org.uk)

## Aqoonsiga sawirka dhacay

Waxaad wali isticmaali kartaa aqoonsiga sawirkaaga haddii uu wakhtigiisa dhacay, illaa iyo inta uu adiga kuu egyahay.

Magaca ku qoran aqoonsigaagu waa inuu ahaadaa isla magaca aad isticmaashay si aad isugu diwaangeliso inaad codeyso.

Haddii aadan shaqsi ahaan u aadi karin goobta codeeynta, waxaad codsan kartaa inaad ku codeyso boostada ama wakiil.



## 2 Boostada ahaan:

- Waraaqahaaga codeeynta waxaa lagu soo diri doonaa toddobaad ka hor maalinta doorashada.
- Calaamadee codadkaaga oo soo celi si ay u yimaadaan ka hor 10 galabnimo 2-da Maajo 2024.
- Waa inaad xasuusataa inaad ku dhammaystirto caddaynta amniga saxiixaaga iyo taariikhdaada dhalashada.
- Haddii aad dib u soo celin weydo codadkaaga inta wakhtigu socdo, lama tirin doono.
- Haddii aad illowday inaad boosti ku dirto, waxaad u qaadan kartaa codkaaga oo dhammaystiran goob boost kasta oo cod-bixineed oo ku taal xaafadda aad ka diiwaangashantahay inaad ka codayso ama xafiiska diiwaangelinta doorashada ee degmadaada.
- Markaad gacanta ku soo celineyso codkaaga boostada waxaad u baahan doontaa inaad buuxiso foom gaaban. Fadlan wakhti sii tan.

Xilliga kama dambaysta ah ee codsiyada codbixinta boostada cusub iyo isbeddellada boostada ama codadka wakiillada ee jira waa 5 galabnimo 17-ka Abriil 2024.

Booqo [gov.uk/apply-postal-vote](https://gov.uk/apply-postal-vote) ama la xidhiidh xafiiska diiwaangelinta doorashada degmadaada.



## 3 Isticmaalka wakiil:

- Haddii aadan awoodin inaad tagto goobta codeeynta waxaad weydiisan kartaa qof aad ku kalsoon tahay inuu wakiil kuu noqdo.
- Tani waxay la macno tahay inay magacaaga ay ku codayn karaan laakiin waxaad u baahan doontaa inaad u sheegto qofka aad doonayso inaad u codayso.

Xilliga kama dambaysta ah ee helitaanka codsiyada cusub si loogu codeeyo wakiil ahaan (ma aha wakiilka boostada ama wakiillada degdegga ah) waa 5 galabnimo markay tahay 24-ta Abriil 2024.

Wakhtiga kama dambaysta ah ee helitaanka codsiyada wakiillada degdegga ah waa 5galabnimo markay tahay 2-da Maajo 2024.

Booqo [gov.uk/apply-proxy-vote](https://gov.uk/apply-proxy-vote) ama la xidhiidh xafiiska diiwaangelinta doorashada degmadaada.

**Wax badan ka ogow barta [londonelects.org.uk](https://londonelects.org.uk)  
@LondonElects  
#LondonVotes**

## SIDA LOO CODEEYNAYO

Waxaa lagu siin doonaa 3 warqadood oo codbixin ah si aad ugu codayso doorashooyinka Duqa Magaalada London iyo Golaha London:


### Duqa Magaalada London (warqadda codbixinta basaliga ah):

- Doorro qofka aad rabto in uu noqdo Duqa Magaalada ee London.
- **Ku calaamadee [X]** meesha ku xiga musharraxa dookhaaga ah. HAL DOOR oo keliya samee.
- Sanadihii hore waxaa suurtoagal ahayd in loo sameeyo doorasho labaad Duqa Magaalada. Sidaas hadda xaalku maaha.




### Xubinta Golaha Deegaanka London (warqadd cod-bixinta jaallaha ah):

- Doorro qofka aad rabto in uu ku matalo degaankaaga Golaha London.
- U codee hal musharrax keliya.
- **Ku calaamadee [X]** meesha ku xigta doorashadaada.



### Xubinta Golaha London oo dhan (warqadda codbixinta oranjiga ah):

- Doorro qofka aad rabto inuu ku matalo London oo dhan Golaha London.
- Codee hal mar kaliya
- **Ku calaamadee [X]** meesha ku xigta doorashadaada.



## MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Markay tahay Abriil 2024, qof kasta oo London uga diiwaangashan inuu ka codeeyo wuxuu heli doonaa buug-yaraha doorashada. Tani waxay liis gareyn doontaa dhammaan musharraxiinta Golaha London, oo ay ku jiraan maanafestooyinka yaryar ee ka socda musharraxiinta Duqa Magaalada oo doorta inay ku siiyaan mid iyo macluumaadka muhiimka ah ee ku saabsan meesha iyo sida loo codeeyo. Ka eeg albaabkaaga inay kaaga soo gasho.

Wixii macluumaad dheeraad ah booqo [londonelects.org.uk](https://londonelects.org.uk), dama la xidhiidh xafiiska diiwaangelinta doorashada degmadaada.